

Barnaamijka Ilmaha ee Buckeye ee Qorshaha Caafimaadka ee OSU

Ma rajeynaysaa inaad ilmo dhasho? Barnaamijka Ilmaha ee Buckeye ee Qorshaha Caafimaadka OSU iyo Qorshahaaga Caafimaadka (YP4H) ayaa halkaan kuu jooga. Waxaan taageero siinaa waalidiinta uurka leh laga bilaabo marka uu uurkooda cusub yahay illaa ay ka gaarayaan lix billood. Dhammaan adeegyadu waa bilaasha waana qarsoodi. waxaana loogu talagalay dadka ka diiwaangashan Qorshaha Caafimaadka ee OSU.

Seminaarada oonleenka ah Waalidka Uurka leh

- Doodaha seminaarada layfka ah ee lagu eego mawduucyada kaladuwan ee la xariira uurka. Inta lagu jiro kulan kasta, waxaad awoodi doontaa inaad soo bandhigto su'aalo iyo inaad fikirkaaga la wadaagto waalidiinta kale ee uurka leh, iyo sidoo kale kalkaalisada iyo tababaraha caafimaadka. Si aad balan u qabsato, booqo osuhealthplan.com/programs-and-services/buckeye-baby. Kulanada lagu qabto taleefanada ee shaqsiyaadka gaarka u ah ayaa la heli karaa marka loo baahdo.

Taageerada lagu bixiyo taleefanka kadib dhalmada

- Kalkaalisoo takhasus leh ama tababare caafimaad ayaa kula shaqeyn doona si ay oga jawaabaan su'aalahaaga iyo si ay kuu siiyaan tilmaamo la xariira qabsashada balanta kulanada taleefanka lagu qabto ee la qabto labo asbuuc, saddex billood, iyo lix billood kadib dhalmada.

Taageerada Naasnuujinta

Kooxda Ilmaha ee Buckeye waxay dadka naaska nuujiya/xabad nuujinta sameeya ka caawin doonaan sidii ay u heli lahaayeen waxyaabaha ay u qalmaan sida bamka elektarooniga ee naaska ahna bilaashka, Qorshaha Caafimaadka OSU ee Buckeyes ee loogu talagalay kooxaha taageera naasnuujinta, latalinta naasnuujinta (waxaa si 100% ah loo daboolaa 1-6 booqashooyin marka loo baahdo).

Booqashada Guriga ee Dhalmada kadib

Dadka dhalaaya ee kunool Franklin iyo degmadooyinka ku heeraarsan ayaa u qalma **booqasho guri oo dheeraad ah oo ay sameyneyso kalkaalisoo ruqsadeysan ayadoo la adeegsanaayo daryeelka caafimaadka (Interim HealthCare)** inta lagu gudo jiro afar illaa toban maalmood kadib marka laga soo saaro isbitaalka si ay u eegeen hooyada iyo ilmaha.

Dhibcaha YP4H

Dhibcaha YP4H waxaa loo heli karaa dadka kujira barnaamijka Ilmaha ee Buckeye. Si aad xog badan u ogaato, booqo yp4h.osu.edu.

Xasuuusin Muhiim ah

Haddii aad qorsheyneyso inaad daboosho Qorshaha Caafimaadka ee OSU, xasuuusnoow waa inaad dhameystirto iska diiwaangelinta oonleenka ah adoo adeegsanaaya Workday muddo 30 maalmood gudahood kadib marka aad dhasho. La xariir Xaafiiska Ohio State ee Waaxda Shaqaalaha adoo ka wacaaya 614-247-6947 ama la xariir hrconnection.osu.edu si aad xog dheeraad ah u hesho.

Xakameynta Niyad jabka dhalmada kadib?

La xariir dhakhtarkaaga isla markiiba. Sidoo kale waxaad la xariiri kartaa Ohio State Employee Assistance Program (EAP, Barnaamijka Caawimaada Shaqaalaha ee Gobalka Ohio) si aad u hesho latalin la xariira walaacyada dhalmada kadib. Wac (800) 678-6265 ama iimayl udir eap@osumc.edu si aad xog badan u ogaato.



Su'aalo ma qabtaa? Iimayl udir OSUHPBuckeyeBaby@osumc.edu ama wac qaybta adeega macaamiisha (614) 292-4700, adoo raacinaaya 0.

Xog badan ayaa laga heli karaa osuhealthplan.com (ku dhufo Buckeye Baby ee ku hoos qoran batoonka barnaamijyada iyo adeegyada).